
# Aad Uga Fikir Inta Aadan Dayntaada Dib U Maalgelin Ku Samayn

Think Hard Before Refinancing

## Muxuu Yahay Macnaha Dib U Maalgelinta Dayntu?

Macnaha erayga dib u maalgelinta dayntu(Refinancing) waa inaad dayn cusub qaadatid si aad ugu bixisid dayntii hore ee guriga lagagaga lahaa isla markaana ay qoladan cusub ee aad lacagta ka daynsatay ay noqdaan qollada guriga dayntiisa kugu leh. Bangiyo badan iyo shirkadaha kale ee kuwa daynta bixiya ah ayaa daynta dib u gata. Qaarkood waxay ka xayaysiiyaan TV yada iyo internetka iyagoo ugu yeeraya inay tahay hab"mucjiso ah" oo aad daynta isakaga bixin karaan dadka daynta lagu leeyahay sababtoo ah waxay kuu ogol yihiin inaad qaadatid lacag dheeraad ah oo aad iskaga bixisid dhamaan daymaha kale. Qaar kale oo ka mid ah Kuwa daynta bixiyaa boostadda ayay kuu soo dhigayaan,e-mailka ayay kaala soo xiriirayaan ama tilifoon ayay kugu soowacayaan. Waxay isku deyayaan inay kaa dhaadhiciyaan in hadii aad foomkooda buuxisid ay dhamaan dhibaatadii xagga daynta kaa haysatay ay xalismayso.



Arrinta dib u maalgelinta dayntu waa arrin soo jiidasho leh, waayo waxay kaa bixinaysaa dayntii ay shirkadaha daynta ururiya kuu soo wacayeen iyo dayntii ay shirkadaha danynta bixiyaa kugu lahaayeen. Laakiin inta badan waxaa dhacday inay arrintani god dheer oo xagga daynta ah kugu sii riddo. **Digtoonoow!**

Marka aad gurigaa dayntiisa dib u maalgelisid waxaa ku hoos qorsoon kharashyo iyo khidmado kale oo dheeraad ah oo adiga lagaa qaadayo,iyo sharciyo cusub oo daynta cusub la socda. Xataa shirkadaha caanka ah ee daynta bixiyaa mararka qaarkood waxay sameeyaan iilasho xagga dayn dib u maalgelinta ah.Ha saxiixin heshiiska dib u maalgelinta Daynta adigoon la tashan dhaqaalayahan aad ku kalsoon tahay oo arimahan dadka kala taliya.

Laakiin daymaha qaarkood , gaar ahaan daymaha caymiska dawladda ku jira sida FHA iyo daynta VA , waxay bixiyaan dayn uu dulsaar keedu yar yahay isla markaana aan shuruudo badan oo xagga sumcadaada dayn bixinta ah aan ku xirnayn ( credit requirements). Hadii dulsarka daynta la socdaa uu yar yahay waxaa wanaagsan inaad meeshii aad daynta ka qaadatay ama qolooyinka arimaha guryaha dadka kala taliya aad waydiisid inay kuu fiiriyaan inaad barnaamijyadaa mid ka mid ah heli kartid.

Waxaad caawimo ka raadsan kartaa:

- Xarunta dhexe ee Lahaanshaha Guryaha tilifoonkan ka wac (651) 659-9336 (hadii aad joogtid nawaaxiga magaalooyinka mataanah ah) ama (866) 462-6466 (gobolka intiisa kale) ama booqo bartan internetka www.hocmn.org

- HUD Housing Counseling (800) 569-4287

Waxay ku siin karaan macluumaadka hay'addo agagaarkaaga degan oo kaala talin kara xagga daynta, ka hortagga in guriga lagaa xaraasho, sidoo kale waxay talo kaa siinayaan inay kugu haboon tahay inaad dayntaada dib u maalgelisid ood dayn cusub qaadatid iyo in kale.

## Gurigaaga Dayntiisa Dib U Maalgelin Ha ku Samaynin Si Aad Biilal Kale Ugu Bixisid

Hadii aad bixin kari waydid daynta gurigaaga, gurigaga waa lagaala wareegayaa! Tani aad ayay uga xun tahay wax kasta oo kale oo kugu dhici lahaa markay noqoto biil aad bixin wayday waayo hadii aad bixin kari waydid biilasha kale sida,kaarka amaahda ee bangiga, biilka korontada,biyaha iyo kulayliyaha, daynta gaariga, ama dayn isbitaal lagaaga leeyahay. Wax raad ah kuma yeelanayso gurigaaga.

## Farqiga U Dhexeeya Daynta Rahmada Leh Iyo Dayn Aan Rahmada Lahayn

Daynta guryuhu waa dayn "la hubo,oon khasaarayn." Daynta la hubo inayna khasaarayn waa daynta aad rahaamad ahaan u dhigtay "hantida ma guurtada ah." Hantida ma guurtada ahi waa mid aad adigu leedahay oo qolada aad daynta ka qaadatay ay qaadanayaan hadii aad daynta bixin waydid. Gurigaagu wuxuu ka mid yahay hantidaada ma guurtada ah waana lagaala wareegi karaa hadii aad daynta bixin waydid. Akhri xogtan kooban halkan, *Xuquuqdaada marka maxkamad amarto in gurigaaga lala wareego.*



Kaararka amaahda ee bangiyadu bixiyaan inta badan dayntoodu ma aha mid la hubo. Hadii aad daynta kaararka bixin waydid way ku dacwayn karaan ka dibna marka qaadigu u xukumo ayay lacagta kala bixi karaan bangigaaga ama ka goosan karaan jeegaaga shaqadda. Laakiin gurigaaga ma qaadan karaan! Akhri xogtan kooban halkan, *Qafaalashada Mushahar/Xisaabta Bankiga Iyo Xuquuqda Aan Leeyahay*.

Sharciga guud wuxuu yahay **weligaa dayn ah nooca aan rahaamadda lahayn ha u badalin mid rahaamad leh.** Si kale hadaan kuugu dhigo waxaa loo jeeda intaad gurigaaga dayn ku qaadatid lacagtaa ha ku bixinin daymaha ay kugu leeyihiin shirkadaha kaararka amaahdu, biilasha caafimaadka, ama daymaha kale ee lagugu leeyahay. Hadii aad ku fikiraysid inaad sidaa samaysid, marka hore la tasho khabiir ah kuwa dadka xagga daynta kala taliya si uu kuula fiiriyo in faa'iido kuugu jirto iyo in kale.

## Ha Ka ogolaanin in Shirkadaha Daynta Ururiyaa kugu cadaadiyaan inaad gurigaaga dayntiisa Dib U Maalgelisid.


Waa shaqaddooda shirkadah daynta ururiyaa inay dayntooda kaaga qaataan si kasta oo ay kaaga qaadan karaanba. Waxaa jiraa siyaabo kale oo aad ulla macaamili kartid. Akhri xogtan kooban halkan ka gal *Xuquuqda Aad Leedahay Deyn Soo Ururinta*. Hadii ay doonayaan inaad daynta gurigaaga gadid ha ka yeelin MAYA! ku dheh.

## Weligaa Daynta Gurigaaga Dib U Maalgelin Ha Ku Samaynin Si aad Daynta gaarigaaga U Bixisid.

Hadii aad bixin kari waydid daynta caadiga ah ee gaarigaaga, gaariga keliya ayaa lagaa qaadanayaa. **Gurigaa dayntiisa dib u maalgelin ha ku samayn si aad daynta gaariga ugu bixisid!!** Hadii aad gurigaaga lacag ku amaahatid si aad daynta gaariga ugu bixisid ka dibna la daahtid bixinta daynta aad guriga ku qaadatay guriga waa lagaala wareegayaa.Sidaa darteed intii aad gurigaaga waayi lahayd waxaa ka fudud inaad gaariga waydid.

## Danyntaada ha Ku Badalin dayn Kale Oo Dulsaarkeedu aad u sareeyo

Dulsaarka daynta cusub ee aad qaadanaysaa waa inuu ka hooseeyo dulsaaarka aad hadda bixisid, hadii kale waad khasaaraysaa –lacag badan ayaanad khasaaraysaa.



La taliye dhanka guryaha ah ayaa kaa caawin kara inaad ogaato haddii ay tahay inaad ka fakarto inaad dib u qaadato dayn khatarteedu yar tahay ama la awoodi karo in la bixiyo mustaqbalka. La tasho la taliye dhanka guryaha haddii:

- Daynta guriga ee iminku ay tahay mid Heerkeeda la Qawimi karo (ARM) *(eeg qaybta xiga)* **iyo** haddii uu heerka dulsaarku ay tahay inuu dhawaan ka kor mari doono inta hadda aad bixiso, ama
- Lacag bixin tijaabo ahayd la gaaray waqtigii la bixin lahaa, ama
- Amaahda hadda aad qabtaa ay u baahan tahay in la geliyo caymiska deynta guryaha lagu qaato.

Si aad u heshid cid kaa caawisa ka go’aan qaadashda daynta iyo khiyaarada aad kala dooran kartid waxaad wacdaa Xarunta Dhexe ee Lahaanshaha Guryaha waxaad ka wacdaa tilifoonkan( 651) 659-9336 (hadii aad joogtid nawaaxiga magaalooyinka mataanah ah) ama (866) 462-6466 (gobolka intiisa kale). Ama booqo bartan internetka www.hocmn.org.

## Ha Qaadanin Dayn Dhowaan Dulsaarkeeda Kor Laguugu Qaadi Karo (ARMs)

Shirkadaha qaarkood waxay isku dayayaan inay kaa gadaan dayn uu aad u yar tahay lacagta bishii la bixinayaa taasoo soconaysa muddo gaaban sida 2 ilaa 3 sano. Waxaa laga yaabaa inaad u aragtid inuu qiimo fiican yahay waayo lacagta aad bilaha u horeeya bixinaysaa waxaa laga yaabaa inay ka yar tahay qiimaha aad bixisid daynta aad markaa haysatid. LAAKIIN sida caadiga ah daymaha noocan ahi waa dabin! Laba sano ka dib qiimaha aad bixinaysay “waxbaa laga badalayaa” oo kor ayaa qiimaha laguugu dalacayaa waxaana laga dhigayaa qiimo ka sareeya qiimihii dayntii hore ee aad dib u maalgelinta ku samaysay inta badan waxa ay noqotaa wax ka badan inta aad awoodo inaad bixiso.


Qaar badan oo ka mid ah saraakiisha daynta bixiyaa waxay kugu oronayaan hadda daynta qaado hadii mustaqbalka dulsaarku kugu kordhana soo noqo waxbaan ka badalaynaaye. Arrintani waa khiyaamo musuqmaasuq ah oo ay isticmaalaan dhamaan shirkadaha daynta bixiyaa. Ma jirto cid ku siin karta balanqaad ah in hadhow marka dulsaarka iyo lacagta aad bishii bixinaysaa ay

kordhaan inaad dayn cusub oo dulsaarkeedu yar yahay aad helaysid. Hadii gurigaaga qiimihiisu hoos u dhaco oo xataa qiimihiisu ka hoos maro lacagta daynta ah ee guriga lagaaga leeyahay, kuuma suuragelayso inaad dayntaada dib u maalgelisid si aad dulsaarka isaga yaraysid markaa waxaad ku khasban tahay inaad dulsaarkaa qaaliga ah bixisid.

Xataa hadii ay kuu suurto gasho inaad dayntaada dib u maalgelisid oo aad dayn cusub saxiixdid lacagta guriga laagaga leeyahay way kordhaysaa waayo waxaa jira dhawr kun oo doolar oo ku baxaya khidmadda kala wareejinta 2 daymood.

Hadii ay suurtogal tahay waxaad isku daydaa, inaad heshid dayn aanu dulsaarkeedu is badalayn 30 ka sano ee soosocda. Taasi waxay kuu sahlaysaa inaad ogaatid qiimaha aad bil walba bixinaysid ilaa dayntu kaa dhamaanayso.

## Waxaad Dayntaada Dib u Maalgelin Ku Samaysaa Keliya Hadii aad Hellaysid Dayn Dulsaarkeedu Yar yahay Lacagta Bishii Lagaa Doonayaana Tahay Waxaad Iska Bixin Kartid.



Marka keliya ee aad u baahan tahay inaad ku fikirtid inaad dayntaada maalgelisaa waa marka aad helaysid dayn uu dulsaarkeedu AAD u hooseeyo (ugu yaraan waa inuu dulsaarkaagii hore ka hooseeyo boqolkiiba hal) isla markaana ay lacagta aad bishii bixinaysaa ay la mid tahay intaad hadda bixisid ama ay ka yar tahay.

WELIGAA ha samaynin inaad daytaada dib u maalgelisid hadii ay daynta cusubi leedahay nidaamka ah “inaad lacag badan oo jumlad ah hal mar bixisid.” Nidaamkani wuxuu u shaqeeyaa wakhti go’an oo aad ku heshiiseen ayaad bishii lacag yar bixinaysaa ka dibna marka wakhtigaasi dhamaado waxaa lagaa doonayaa inaad lacagta inta hadhay oo dhan aad hal mar wada bixisid. Tani waxay kuu sharaxaysaa sababta ay u yarayd lacagta aad bishii bixin jirtay. Sababtuna waxay ahayd lacagtii aad bixin jirtay waxay ahayd dulsaarka keliya laakiin lacagta daynta ah ee caadiga ah weligaa ma aadan bixinin. Waxaana laga yaabaa in lacagta lagaa rabo inaad hal mar bixisaa ay tahay kumanaan kun oo doolar. Markaa hadii aadan lacagta haynin wakhtigii balantu ahayd isla markaana aad waydid cid dayn cusub ku siisa guriga waa lagaala wareegayaa.

Xataa hadii aad dayn cusub heshid qiima fiican kuma helaysid waayo waxaa lagaa doonayaa inaad bixisid dhamaan khidmadda iyo kharashyadda kala wareejinta labadda daymood.

## In Dayntaada wax laga badalaa way ka duwan tahay in Dayntaada maalgelin cusub lagu sameeyo

Waxaa laga yaabaa inaad maqashay barnaamijka loogu yeero” wax ka badalidda daynta”. Nidaamka dayn wax ka badalidu wuu ka duwan yahay inaad dayn dib u maalgelinta. Macnaha **dayn wax ka badalidu** waa waxaad ogolaanaysaa in qodobadii hore ee aad ku heshiiseen wax laga badalo.

Laakiin dayn dib u maalgelintu macnaheedu waa dayntii lagugu lahaa ayaa lagaa bixinayaa ka dibna qoladda cusub ee **dayntaadii hore** bixisay ayay hadda ka dib daynta kugu leh. Habka dayn wax ka badaliddu waxaa laga yaabaa inuu kuu noqdo farsamo wanaagsan oo aad gurigaaga kaga badbaadisid in lagaa xaraasho. Sidoo kale waxay kugu caawin karaan in lacagta aad bishii bixisid laga dhigo mid aad si fudud isaga bixin kartid.

Ka digtoonoow waxaa jira dad kuu soo bandhigaya inay kaa caawiyaan wax ka badalidda dayntaada oo khidmad kaa raba. Waxaa jira hay'addo khayri ah oo kaa caawinaya wax ka badalidda daynta isla markaana aan wax lacag ah kaa rabin.

Hadii aad doonaysid in lagaa caawiyo wax ka badalidda dayntaada, waxaad wacdaa Xafiiska waaxda Lahaanshaha Guryaha oo tilifoon koodu yahay (651) 659-9336 nawaaxiga magaalooyinka mataanaha ah hadii aad ka soo wacaysid banaanka magaalooyinka mataanaha ah waxaad wacdaa (800)462-6466. Sidoo kale waxaad booqan kartaa bartooda internetka halkan ka gal www.hocmn.org.

## Fursadaha Lagaaga Fududay Karo Bixinta Daynta

Qaar badan oo ka mid qolyaha amaahda guryaha lagu qaata bixiyaa waxa ay ku baaqaan xalal kale oo aan ka ahayn dib u maalgelinta iyo bedelitaanada haddii uu dhib kaa haysto bixinta amaahda guri qaadashada. Tusaale, waxaa laga yaabaa inay kuu ogolaadaan in "lacagta aad bixinaysay wax lagaa dhimo ama dhamaanba in muddo ah la joojiyo" inta aad wakhtigan adag ku jirtid. Taas macnaheedu waxaa weeye muddo ayaad lacagtii aad bil walba bixinaysay joojinaysaa hadii ay kaa ogolaadaan.

Aad ayay muhiim u tahay inaad fahantid shuruudaha ku xiran barnamijkan daynta bixinteeda dib loogu dhigayo. Khaasatan waxay arrintani muhiim u sii tahay markaad dib u bilawdid lacagtii daynta ee aad bil kasta bixin jirtay iyadoo sababtu tahay inaad dhibtii ka baxday ama qoladda daynta kugu lihi ay kugu khasbeen inaad dib u bilawdid bixinta daynta. Qaar ka mid ah kuwa daynta bixiyaa waxay dadka ku yiraahdaan waa inaad hal mar bixisid dhamaan lacagtii kugu baaqatay mudadii aadan waxba bixin jirin. Ama waxaa laga yaabaa inay kaala shaqeeyaan sidii ay kuula dejin lahaayeen qorshe aad dayntaas ku bixinaysid. Tani waxay keenaysaa inaad bixisid bil walba wax ka badan intii aad bil walba bixin jirtay ilaa aad wada bixisid lacagtii kugu baaqatay. Waa inaad ogtahay dhamaan shuruudaha si aad qorshe u sii dejisatid!



Wixii kale ee akhbaar ah, kala hadal qolada amaahdaada guri qaabashada ama Home Ownership Center wacdaa (651) 659-9336 hadii aad ka soo wacaysid magaalooyinka mataanaha ah, laakiin hadii aad ka soo wacaysid banaanka magaalooyinka mataanaha ah waxaad wacdaa (800)462-6466. Sidoo kale waxaad booqan kartaa bartooda internetka halkan ka gal www.hocmn.org. Waxaa laga yaabaa inay hayaan barnaamij caawiya dadka guryaha leh oo ka caawinaya sidii aad u bixin lahayd lacagta dayta guriga ee bil kasta lagaa doonayo inaad bixiso.

## Ka digtoonoow Kharashyadda Dheeraadka ah

Waxaa jira kharashyo go'an oo lagaa rabo inaad bixisid marka aad daynta gurigaaga dib u maalgelinaysid. Inta badan marka daynta dib loo maalgelinayo waxaa jira "kharash khidmad ahaana" oo ay qaadanayaan qolada aad daynta cusub ka qaadatay, waxaa kaloo jira kharash ku baxaya warqadda lahaanshaha guriga,iyo kharashyo kale, intaa waxaa dheer lacagtii dulsaarka ahayd. Waa inaad sii ogaatid inta uu kharashku noqonayo marka dhamaan kharashyadaa la isku daro waydiisidna su'aalo hadii ay jiraan wax kharash ah oo aadan fahmin waxa uu yahay.

Ka digtoonoow Waxyaabaha "dheeraadka ah" sida caymiska la geliyo daynta,kaa soo loogu yeero caymiska daynta guriga. Caymiska dayntu isaga ayaa daynta guriga kaa bixinaya hadii aad bixin kari waydid sababtuna tahay inaad naafo noqotay, shaqo la'aani kugu dhacday,ama aad dhimatid. Intooda badan dadka daynta qaataa uma baahna inay caymiska daynta gataan. Laakiin meelo badan oo ka mid ah kuwa daynta bixiyaa waxay isku deyayaan inay kuu qariyaan ama waxay kaaga dhigayaan inaad u baahan tahay caymiskan si aad dayn u heshid. Iyagu lacag badan ayay ka sameeyaan gadida caymiskaas laakiin adiga wax badan kuuma qabanayo.

Mararka qaarkood ikhtiyaar ma lihid oo waad ku khasban tahay inaad caymiskan gadatid wuxuuna la socdaa daynta guriga ee aad qaadanaysid.Marka hadii xaalku sidaa yahay waa inaad fahantid sida uu u shaqeeyo. Sida badan xaq ayaad u yeelanaysaa inaad caymiskan joojisid marka aad muddo dheer aad bil walba dayntaada si joogta ah u bixisid. La tasho qof ah dadka daynta dadka kala taliya si aad u ogaatid inaad xaq u leedahay inaad joojisid bixinta caymiska.

Lacagta aad khidmadda u bixinaysid marka aad daynta cusub qaadanaysid, iyo dhamaan kharashyada kale ee la socda daynta cusubi, marka la isku wada daro waa inayna ka badan boqolkiiba 2 ama 3 guud ahaan daynta aad qaadanaysid.

## Ka Digtoonow Hadii Aad Dayntaada Muddo Gaaban Kuwadda Bixisid Waa Lagu Ganaaxi Karaa

Hadii aad ku fikiraysid inaad dib u maalgelisid dayn aad sanado yar ka hor qaadatay, marka hore la tasho khabiir xagga daynta ah si aad u waydiisid in lagu ganaaxayo hadii aad daynta qolo kale ka dib u maalgelin kuugu sameeyaan qoladii horana lacagtooda la wada siiyo.
Meelaha daynta bixiya qaar ka mid ahi mararka qaarkood dadka ma ganaaxaan. Tusaale, hadii ay dib u maalgelinta kuu sameeyaan qayb ka mid ah isla qoladii hore ee lacagta ku daymisay wax ganaaxa kaama qaadayaan.

Laakiin qaar ka mid ah kuwa daynta bixiyaa "wayku ganaaxayaan hadii aad dayntaada dib u maalgelin ku samaysid" waxaa jira qodob heshiiska ku jira oo dhigaya hadii aad dayntaada hal mar wada bixisid 3 ama 4 sano ee ugu horaysa waa inaad qoladii aad daynta ku siisay aad siisaa lacag ganaax ah. Waxaa laga yaabaa in ganaaxani noqdo lacag aad u badan. Sida caadiga ah waa lacag u dhiganta intii aad bixin lahayd 2 ama 3 bilood. Si taxdar leh u akhri heshiiskii aad daynta ku qadatay.

Hadii lagu ganaaxo iyadoo wakhtiga aad daynta qaadatay uu 4 sano ka badan yahay, ama lagu ganaaxo wax ka badan wixii aad bixin lahayd 2-3 bilood, la tasho qareen, waxaa laga yaabaa in ganaaxa lagu saaray uu sharci daro yahay.

Kolka aad isku wada darayso kharashka dib u qaabeynta deynta, hubi inaad ku darto wixii ganaaxyo ah ee la xiriira horey u bixinta deynta kharashaadkaaga guud. Markaad xisaabtantid Ka dib go'aami in marka dhaqaala ahaan la fiiriyo ay faa'iido kuugu jirto iyo in kale.

## Waxaad Haysataa Muddo 3 Maalmood ah Oo Aad Kaga Noqotid Noockasta Oo Dayn ah Oo Aad Qaadatay Xataa ta Guriga

Markaad daynta cusub qaadatid ka dib waa inay ku siiyaan "Ogaysiis oranaya xaq ayaad u leedahay inaad daynta ka noqotid." Waxaad soo buuxin kartaa foomka, ka dibna waxaad ku soo celinaysaa muddo 3 maalmood gudaheed ah si aad dhamaan heshiiska uga noqotid. Hadii ayna ku siinin foomka ogaysiiska, doonaysidna inaad heshiiskii daynta cusub ka noqotid, waxaad soo qortaa warqad aad ku leedahay *ma doonayo in aan dayntayda dib u maalgelin ku sameeyo oo aan dayn cusub qaato. Waxaan doonayaa inaan dayntii cusbayd ka noqdo.* Ka dibna saxiix oo taariikhda ku qor. Adigu nuqul la har. Warqadaa gacanta ugu gee ama boostada intaad ka diiwaangelisid ka dir kuna hagaaji bangiga ama shirkadii aad daynta ka qaadatay waana inay warqadaa ku helaan sedex maalmood intayna ka soo wareegin maalintii aad daynta qaadatay. Meel ku xafid lacag qabashada cadaynaysa inaad warqadaa boostada ka diiwaangelisay kana dirtay. Inaad ka noqotid daynta aad dib u maalgelinta ku samaysay waxay noqon kartaa hawl adag. Sidaa darteed la tasho qareen hadii aad go'aansatid inaad daynta ka noqotid.




***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**